Waxaad Ku Biirtaa Kooxda Waalidiinta

Dugsiyada badankooda waxaa ka jira koox waalidiin ah ee nidaamsan kuwaasoo horumariya bey'adda wax-barasho ee ardayda islamarkaana caawiya macallimiin-ta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Kooxda waalidiinta ee mutadawaca ah ayaa suuragal ah in ay dugsiga ka qabtaan taageero kala duwan, iyagoo soo aruurinaya miisaaniyad wax looga qabto mashaariicda dugsiga, iyo iyagoo kafaalo qaadaya munaasibooyin isku xiraya qoysaska. Caadi ahaan waxaa ay qabtaan kulanno kala duwan oo ay ka soo qayb gali karaan waalidiinta oo idil.

Kooxda dalka ugu weyn ee waalidiinta waa PTA, ama (Parent Teacher Association)Ururka Waalidka ioy Ma-callinka, oo ah hay'ad heer qaran ee aan faa'ido doon ahayn. PTA-ga Gobolka Washington waxaa uu leeyahay xafiis heer gobol iyo xafiis hoosaadiyo ku dhex yaal dugsiyada.
Xubnaha ayaa qaybtooda bixiya, iyadoo qayb lacag-taasi lagu taageero xarunta dhexe ee hay'adda, oo lagu taageero sharciyada carruurta ku saabsan, bog bal-laaran oo internetka ah, tababarro xubnaha la siiyo, iyo munaafacaadyo kale.

Hase ahaatee, dhammaan kooxaha waalidiinta ee dugsiyada kama tirsana PTA-ga. Koox dugsi ka tirsan oo aan qayb ka ahayn hay'ad weyn waxaa mararka qaarkooda loogu yeedhaa PTO, oo loola jeedo Hay'adda Waalidka iyo Macallinka. Kooxda oggol in ardayda ka mid noqoto xubnaha ayaa loogu yeedhaa PTSA, (Parent Teacher Association)Ururka Waalidka Macallinka iyo Ardayga.

Xafiiska dugsiga ayaa caadi ahaan ka warbixin kara kooxaha waalidiinta ee dugsigaaga ka jira.

Waa Maxay Doorka Dugsiga?

Maamulka dugsiyada ee degmooyinka qaarkooda waxaa ay soo saareen nidaamyo qoyska looga qayb gelinayo iyadoo kuwo kale ay si aan rasmi ahayn ula shaqeeyaan qoysaska. Dugsiyada hela Miisaaniyadda Darajada I ee dawladda dhexe waxaa sharci ahaan laga doonayaa in ay qoysaska ka qayb qaataan hawlaha, iyadoo qaar kalena ay helaan miisaaniyad dadaalkani ka caawisa. Ma jiro sharci uu soo saaray gobolka Washington ee sheegaya in dugsiyada ay la shaqeeyaan qoysaska, balse dugsiyada fiican badankooda waa ay la shaqeeyaan waalidiinta.

WAXYAABAHA SOO SOCDA AYAA AH WAXYAABO AASAAS AH EE AAD KA FILAN KARTID DUGSIGAAGA:

- **Jawi soo dhaweynayaa oo kugu dhiirigelinaya in aad ka qayb qaadatid waxbarashada ilmahaaga.**
- **Qaddarin, tixgelin soo dhaweyn leh ee aad ka heshid shaqaalaha dugsiga.**
- **Waqti gaaban, iyo ra'yi qaddarin leh oo looga soo jawaabo waxyaabaha aad ka walwal qabtid.**
- **Macluumaadka ku saasbsan sida ardayda looga caawiyo daruusta aqalka loo qaato iyo taageerada waxbarashada ee aqalka.**
- **Iskaashiyada lala yeesho hay'adaha bulshada ee qoysaska caawiya.**
- **Dugsiyo kala nooc ah: Macluumaadka qoysaska oo af Ingiriis iyo luqado kale lagu tarjumay.**

Office of the Education Ombudsman (Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada)
1110 Capitol Way S, Suite 304
P.O. Box 40004
Olympia, WA 98504-0004

Khadka bilaashka ah: 1-866-297-2597
FAAKIS: (360) 586-0052
www.waparentslearn.org

Waxaad la soo xiriirtaa (Office of the Education Ombudsman) Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada haddii aad doonaysid in aad heshid dukumeentigan oo noocyo kale ah ee loogu talagalay dadka naafada ah.

(Office of the Education Ombudsman) Xafiiska Sarkaalka Ashta-kooyinka ee Waxbarashada waxaa uu siiyaa ardayda, qoysaska iyo bulshada macluumaadka ku saabsan nidaamka waxbarashada dadweynaha, waxaana ay dhiirigeliyaan ka qayb qaadashada waxbarashada ee qoysaska iyo bulshada, waxaana uu ka caawiyaa qoysaska iyo ardayda xal u helidda khilaafaadka dugsiyada ku saabsan.

Ka Qayb Qaado Waxbarashada Ilmahaaga
Participate in Your Child's Education

Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada
Office of the Education Ombudsman
Tilmaamaha Qoyska
Ka Qayb Qaadashada Dugsiga
A Guide for Families
Getting Involved at School

Gobolka Washington
Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka
State of Washington
Office of the Governor

Somali

Ilmahaaga iyo Dugsigaaga Ayaa Kuu Baahan

Carruurta waxaa ay baahan yihiin macallimiinta fiican iyo taageerada qoyska si ay dugsiga ugu horumaraan. Daraasadda qaranka ayaa si joogta ah u muujinaysa in marka waalidiinta iyo dugsiyada ay si iskaashi leh u wada shaqeeyaan, in ardayda ay guuleystaan. Tani waxaa ay si dhab ah u quseynaysaa dhammaan qoysaska ku kala duwan xagga jinsiyadda, heerka dakhliga, iyo waxbarashada, iyo haddii ay ka yimaadeen dugsiyo ku yaal baadiyaha ama magaalada.

Waa Maxay Ka Qayb Qaadashada Qoyska ee Waxbarashada?

Ka qayb qaadashada qoyska waxaa uu ka taagan yahay ka qayb qaadashada joogtada ah ee ay qoysaska iyo mas'uuliyiinta kaga qayb qaadanayaan nolol dugsiyeedka carruurtooda. Ka qayb qaadashada qoyska ayaa ah in ay iskaashi la yeeshaan macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Waalid kasta ama xubin kasta ee reerka ka tirsan waxaa ay leeyihiin xirfado, waayo aragnimo iyo wacyi nololeed kala duwan, sidaa awadeed dhammaanteennu waxaannu leenahay qaabab kala duwan ee aan uga qayb qaadan karno, taageeri karno iyo wax ku kordhin karno waxbarashada carruurtayada.

Nooca ugu fudud ee ka qayb qaadashada qoyska ayaa ah in ay xaqiijiyaan in ardaygu uu dugsiga tago maalin kasta kaddib marka uu helo jiif ku filan, uu soo cuno quraac caafimaad leh soona xirto labbis munaasib ah. Waalidiinta qaba waqti iyo awood ay si mutadawacnimo leh uga qayb qaataan hawlaha dugsiga ee kooxda waalidka ayaa ah ka qayb qaadasho muhiim ah.

Siyaalaha Ugu Fiican ee Looga Qayb Qaato

Waxyaabaha ugu fiican ee ay waalidiinta dugsiga u qaban karaan carruurtooda ayaa ah in ay muhiimadda hore ee qoyska ka dhigaan horumarka waxbarashada. Waxaa jira siyaalo kala duwan ee ardaygaaga loo tusin karo sida aad u aaminsan tahay waxbarashada. Waxaad calaameysaa ra'yiga hoose ee aad kaga mid dhigi kartid waxyaabaha uu qoyskaaga sameeyo.

WAXAAD AQALKA KA DHIGTAA XARUN WAXBARASHO

- ☐ Waxaad maalin kasta carruurtaada wax ugu akhrisaa, af Ingiriis ama luqaddaada hooyo. Waxaad isticmaashaa buugaag, calaamadaha iidhehda, baakadaha cuntada ama wax kasta oo agtiina yaal. Haddii aadan akhriska ku kalsooneyn, waxaad kala hadashaa sawirro ama sawirrada buugaagta ku yaal, ama ilmahaaga ha kuu akhriyo.
- ☐ Waxaad sameysaa waqti joogta ah iyo meel daruusta aqalka maalin kasta lagu sameeyo. Dami Telefishinka.
- ☐ Ogsoonow waxa uu ilmahaaga baranayo. Adiguba wax cusub baro.
- ☐ Waxaad hubisaa in ilmahaaga uu helo hurdo ku filan habeen kasta iyo quraac fiican inta uusan dugsiga billaabmin.
- ☐ Qoyskaaga ha ka qayb qaato hawlaha bulshada ee lagu kordhinayo waxbarashada dugsiga.
- ☐ Ilmahaaga u sheeg in aad ka filaysid in ay dugsiga ku wanaagsanaadaan.

LA XIRIIR DUGSIGA

- ☐ La socodsii dugsiga wixii uu ilmahaaga u baahan yahay iyo wixii isbeddel ah ee qoyska ku yimaad.
- ☐ Waxaad sameysataa nidaam aad si joogta ah ula xiriirtid macallinka ilmahaaga.
- ☐ Caadi ahaan waxaad eegtaa daruusta aqalka ee ilmahaaga, u xaadiritaanka dugsiga iyo horumarka waxbarashada.
- ☐ Ka wada jawaab dhammaan fariinada dugsiga.
- ☐ Waxaad ka qayb qaadataa kulannada, munaasibooyinka dugsiga iyo shirarka macallinka iyo waalidka.

CAAWI DUGSIGA

- ☐ Waxaad kala shaqeysaa macallimiinta sidii loo heli lahaa qalabka waxbarashada, barnaamijyada dhiirigeliya ardayda, iyo sidii miisaaniyad loo heli lahaa.
- ☐ Haddii aadan si mutadawac ah uga qayb qaadan karin dugsiga xilliga fasallada la qaato, waxaad dugsiga waydiisaa sidii aad u caawini kartid adigoo aqalka jooga ama maalmaha fasaxa.
- ☐ Haddii aad waqti qabtid, waxaad macallinka ku caawisaa fasalka.
- ☐ Waxaad isku habeysaa oo tababartaa qoysaska kale si loo sameeyo koox mutadawac ah.
- ☐ Waxaad ka caawisaa maamulka iyo sidii loo sameyn lahaa liiska taleefoonada ama e-mailka ee fasalka gudihiisa.

WAXAAD NOQOTAA QOF HOGGAAMIYE AH

- ☐ Waxaad barataa nidaamka uu u shaqeeyo dugsiga iyo sida loogu doodo carruurta dhammaantooda.
- ☐ Waxaad ka mid noqotaa guddiyada go'aanka gaara ee dugsiga.
- ☐ Waxaad isku habeysaa kooxda waalidiinta ee dugsigaaga ama waxaad door lixaad leh ka ciyaartaa hay'adda waalidka ee dugsiga.
- ☐ Waxaad qaadataa fasallo aad ku horumarinaysid xirfaddaada hoggaamiyenimo.
- ☐ Waxaad noqotaa qof taageersan waxbarashada dadweynaha. Wax ka baro sharciyada gobolka iyo kuwa deegaanka ee waxbarashada.

WAXAAD KA CAAWISAA BULSHADA SIDII AY DUGSIGA UGU SOO BIIRI LAHAAYEEN

- ☐ Waxaad ku dhiirigelisaa dugsigaaga in ay siiyaan waalidiinta oo idil macluumaadka ku saabsan adeegyada iyo khayraadka bulshada.
- ☐ Haddii ardayda dugsiga dhigata ay kala duwan yihiin, waxaad ogaataa hay'adda u adeegta kooxaha kala dhaqanka duwan oo dugsiga ka caawisa sidii ay ugu xirmi lahaayeen oo ay adeegyo qoysaska ugu qaban lahaayeen.
- ☐ Waxaad ilmahaaga u qorsheysaa waayo aragnimo xag dhaqan iyo xag waxbarasho. Waxaad fursadahan la wadaagtaa qoysaska kale iyo dugsiga ilmahaagu uu dhigto.
- ☐ Waxaad dugsiga ka caawisaa sidii loo qori lahaa oo tababari lahaa mutadawaciinta bulshada iyo lataliyeyaal ka kala socda kooxo kala duwan.
- ☐ Waxaad u mahad celisaa ganacsatada taageerta waxbarashada iyo dugsiyada.

Maa Waxbarashada Dugsiga Loo Daayo?

Ra'yiga ka qayb qaadashada qoyska ee dugsiyada Mareykanka waxaa uu billaabmay dabayaaqadii 1800-kii. Iyadoo wada shaqeynta qoysaska iyo dugsiyada loo arkay ra'yi fiican sababo badan awadood, dadka ma aysan garan in faa'ido badan ay u leedahay waxbarashada ardayga. Hase ahaatee, daraasadda qaranka ee 40-kii sano la soo dhaafay ayaa muujisay in hadba inta ay qoysaska ka qayb qaataan waxbarashada carruurtooda, ay ardaydaasi ka guul gaaraan dugsiga.